

Walidiinta ayaa lagu casuumayaay

Kulan xog iyo wada hadal ah oo ku saabsan isla meel dhigida xanaanooyinka iyo iskuulada Degmada Värmdö waxeey ku martiqaadeysaa kulan war iyo wada hadal ah oo ku saabsan isla meel dhigida xanaanada / iskuulada. Kulanku waa mid dijitaal ah wuxuuna dhacayaa Sebtember 29 sacada markay tahay 18.00.

Asalka meesha la wadaago ayaa ah in boosas badan ay ka jiraan iskuulada degmada iyo xanaanada caruurta isla markaana loo baahan yahay in la waafajiyo, maadaama dhismayaal badan oo hada la isticmaalo aysan u fiicneyn caruurta.

Xafiiska waxbarashadu wuxuu hadaf ka leeyahay inuu mideeyo qaar ka mid ah iskuulada degmada iyo xanaanooyinka.

Dhismayaal sax ah oo tayo sare leh

Hadafku waa in la kordhiyo suurtagalnimada in la bixiyo dhisme sax ah oo gacan ka geysan kara abuuritaanka barbaarinimo iyo dhaqaale ahaan iskuulka barbaarinta iyo qaybaha iskuulka ee Värmdö. isbedelku wuxuu mustaqbalka fog u horseedi doonaa unugyada harsan inay helaan xaaladaha ugu fiican ee ugu macquulsan si ay u ilaaliyaan tayada iyo adeegga sare, iyo sidoo kale inay abuuraan aasaas wanaagsan oo ku saabsan waxbarashada iyo horumarka carruurteenna.

Soo jeedintu waxay u socotaa go'aanka guddiga waxbarashada Oktoobar, guddiga degmada 28 Oktoobar iyo golaha degmada bishii Diseembar. Isbedelada waa la cusbooneysiin doonaa iyadoo lala xiriirinayo bilowga iskuulka Agoosto 2021.

Dib u habaynta iskuulka iyo xanaanada

Hindisahan ayaa khuseeya dugsiyada barbaarinta ee Kotten, Minimunkis, Lokatten, Blåsippan, Blomkulan, Åkerlyckan iyo Farstaborg. Kuwaas, Åkerlyckan iyo Blomkulan ayaa la baari doonaa si loo horumariyo dhismooyinka iyo howlaha hada socda. Koontaroolka waxaa gebi ahaanba loo qaaday dugsiya barbaarinta ee Fågelvik. Carruurta ku jirta Minimunkis waxaa loo soo bandhigaa inay u guuraan dugsiya xanaanada carruurta ee Munkmora, carruurta Lokatten waxaa la siiyaa boos dugsiya

barbaarinta ee Haghulta. Dugsiga barbaarinta ee ku yaal Farstaborg wuxuu ahaa mid kumeelgaar ah oo laga sugayo dugsi barbaarin cusub oo ku taal Charlottendal, kaas oo diyaar noqon doona horaanta 2021.

Munkmoraskolan ayaa la soo jeediyay in la xidho oo hawlaheeda loo wareejiyo Ekedal. Si tan loo suurtagaliyo, sanadka afaraad waxaa laga raray Ekedal loona wareejiyay Kvarnberget. Fursadaha howlaha kale ee muhiimka u ah bulshada ee Munkmoraskolan waa in la baaraa.

Isbedelada ka socda Blåsippan waxaa la hirgelin doonaa bisha augusti 2022.

Kulan xog iyo wadahal 29 Sebtember

Degmada Värmdö waxay ku soo dhaweyneysaa masuulada ay khusayso kulanka macluumaadka iyo wadahalalka dijitaalka ah 29 september at 18 marka soo jeedinta la soo bandhigi doono. Markaa waxaa fursad loo heli doonaa in su'aalo lagu waydiiyo dhinaca wada sheekaysiga. Xiriirinta kulanka ayaa loo diraa si gooni gooni ah.

Ka soo qeyb galayaasha degmada Värmdö ayaa kala ah Peter Bergström oo ah madaxa waxbarashada, Cecilia Lindberg oo ah gudoomiyaha gudiga waxbarashada, Fredrik Sneibjerg, gudoomiye ku xigeenka gudiga waxbarashada, Ingmarie Lagne, agaasimaha iskuulka, Mats Lundström, agaasimaha iskuulka iyo xiriiriyaha Erik Sanner, madaxa waaxda xakamaynta iyo tayada.